

FAAFIN



RASMI AH

الرسمية

الجريدة

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 4aad

Muqdisho, 1da Setember 1976

L. 9

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qortitaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraaha ee Wasaaradda Lacagta

K O O B N I I N

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 22 ee 30 Juunyo, 1976 *Tababar Maamulka xa-fiisyada 'Muddo 3 Bilood ah loofuray Ardada Shaqada Qaranka.*

» 608

SHARCI L. 23 ee 16. Agoosto 76 *Dhismaha Wakaaladda Daaga ee Qaranka.*

LAW L. 23 ee 16 Agoosto 76 *National Range Agency.*

» 610

BOGGA LABAAD

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD 19 Luulyo 76 *Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyey (Libera Disponibilita) Jaalle Cabdulqaadir Xaaji Sheegow — ku yaal Muqdisho Xaafadda Hodan, kuna fadhiya mq. 450/ Guri lamb. H. 0.828.*

Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay libera Disponibilita' Jaalle Maxamuud Cabdi Xirsi Warsame — kuna fadhiya mq. 450/ Guri L. WIG 84. L. 82

» 614

XEER WASAARADDA GANACSIGA 15 Agoosto 1976, *Iskaashatada Xamaaliga ee lagu Magacaabo «Liiban» L.83*

» 618

XEER WASAARADDA GANACSIGA 15 Agoos. 1976 *Iskaashatada *anacsiga «HILLAAC L. 84.*

» 621

BOGGA SADDEXAAD

TALOOPYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 3 Ago. 76 <i>Bedde- laad Naado Dhul Jaalle Cabdulqaadir Nuur Salaad L. 309</i>	»	623
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 18 Ago 76 <i>Bedde- laad Naado Dhul Jaalle Cali Ciise Ileye L.310</i>	»	624
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 24 Ago. 76 <i>Naado Dhul Jaalle Caasha Maxamed Kulan L. 311</i>	»	625
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 24 Ago. 76 <i>Naado Dhul Raxma Gurxan Cilmi L. 312</i>	»	626
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 24 Ago. 76 <i>Naado Dhul Jaalle Maxamed Jaamac Badmaax L. 313</i>	»	627
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 24 Ago. 76 <i>Naado Dhul Jaalle Cali Faarax Gadiid L. 314</i>	»	628
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 24 Ago. 76 <i>Naado Dhul Jaalle Maxamed Xaaji Xuseen L. 315</i>	»	629
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 24 Ago. 76 <i>Naado Dhul Jaalle Sheekh Gabdi Maxamed (Madoobe) L. 316</i>	»	630
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 24 Ago. 76 <i>Naado Dhul Jaalle Hodan Ciise Cabdi L. 317.</i>	»	631
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 24 Ago. 76 <i>Naado Dhul Jaalle Ciise Muuse Saciid L. 318.</i>	»	632
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 24 Ago. 76 <i>Naado Dhul Jaalle Cosob Barkhadle Faahiye L. 319.</i>	»	633
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 24 Ago. 76 <i>Naado Dhul Jaalle Caasha Guuleed Maxamed L. 320</i>	»	634
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 24 Ago. 76 <i>Naado Dhul Jaalle Madiina Jumcaale Cawaale L. 321</i>	»	635
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 24 Ago. 76 <i>Naado Dhul Jaalle Xuseen Maxamed Nuur L. 322</i>	»	636

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 24 Ago. 76 Naado <i>Dhul Jaalle Muxidiin Maxamed Nuur L. 323</i>	»	637
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 24 Ago. 76 Naado <i>Dhul Jaalle Cali Maxamed Jumcaale L. 324.</i>	»	638
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 24 Ago. 76 Naado <i>Dhul Jaalle Daahir Maxamuud Kahyre L. 325</i>	»	639
MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 15.6.76 Lu- <i>midda Buugga kaydka Lainb. 4 ku qoran Sh So 8.780</i> <i>uu leeyahay Yaasiin Aadan Faarax L. 326</i>	»	640
OGEYSIIS — <i>Saamilyda Warshadda Saabuunta Qubeyska</i> <i>iyo Mariska (L. 327)</i>	»	641
SHIRIKADA SOOMAALI ARLINES 8 P.A. 31 Agoos- <i>to 76 Ogeysiis L. 328</i>	»	642

BOGGA KOOWAAD

SHARCI (L.22) ee 30 Guunyo 1976 Tababar maamulka Xafiisyada muddo 3 Bilood ah loo furay Shaqada Qaranka.

TABABAR MAAMULKA XAFIISYADA MUDDO 3 BILOOD AH LOO FURAY SHAQADA QARANKA.

ISAGOO ARKAY: Xaashic'a 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka Oktoobar 21kii 1869;

ISAGOO ARKAY: Wareegtada Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka tirsigeedu yahay XGM. GSK 46.61.76 ee 3.2.1976, kuna saabsanayd in Ardada Shaqada Qaranka la siiyo Tababar Maamulka Xafiisyada;

ISGGO TIXGELINAYA: Baahida loo qabo in Ardada Shaqada Qaranka la siiyo tababar Maamulka Xafiisyada markay dhibaato kala kulmeen habka hawlaha Xafiisyada Dawladda;

ISGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAY:

SHARCIGA SOO SOCDA:

Qod. 1aad

Waxaa loogu furay Dugsiga Sare ee Booliska sannad walba Ardada soo dhameysata Shaqada Qaranka Tababar muddo 3 (saddex) bilood oo ay ku baranayaan Maamulka Xafiisyada.

Qod. 2aad

Qabanqaabinta Tababar waxaa loo xilsaaray Xafiiska Siyaasadda ee MGSK. Ciidanka Nabadsugida, Xogga Dalka Soomaaliyeed, Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta, Machadka Sidam, iyo Taliska Ciidanka Booliska wixii ku saabsan baaridda Sharciyada.

Qod. 3aad

Ardada soo dhameysata Shaqada Qaranka muddada ay ku jiraan tababarka waxaa la siinaya mushaharkii ay hore u qaadan jireen markii Shaqada Qaranka ay hayeen, iyadoo lacagta mushaharkooda ay bixinayaan Wasaaraddaha iyo Wakaaladaha ay ka tirsan yihiin,

Qod. 4aad

Haddii ay Wasaaradaha iyo Wakaaladuhu u baahdaan in tababarro gaar ah loo siiyo Ardayda Shaqaalahooda ah, waxay u soo dirsan karaan Machadka Tababarka Macallimiinta xirfaaddas u leh.

Qod. 5aad

Qof aan ahayn Ardada soo dhmmaysata Shaqa'a Qaranka kama qaybgalayo Tababarkan ku tilmaaman qodobka 1aad.

Qod. 6aad

Sharcigan dhaqso ayuu u dhaqan galayaa; waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 30 Gii. 1976

(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

GUDDOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

SHARCI (L.23) ee 16.8.1976 Dhismaha Wakaaladda Daaqa ee Qaranka.

DHISMAHA WAKAALADDA DAAQA EE QARANKA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii G.S.K. iyo kan Xoghaya-yaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAY

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Wakaaladda Daaqa ee Qaranka ayaa la dhisay;
2. Wakaaladdu waxay ahaan doortaa mid madax bannaan oo awood qaynuuni leh; waxaana lagu c'haqayaa qawaaniinta hoos ku qoran:-

a) — Qaynuunka tirsigiisu yahay 16 soona baxay 1dii Abriile 1970kii ee lagu Xukumo Wakaaladaha madaxa bannaan iyo wixii beddelaad ka dambeeyey;

b) — Qaynuunkii tiradiisu ahaa 36 ee taariikhdiisuna ahayd 22.4.1972 ee ku saabsan Shaqaalaha madaxa bannaan;

c) — Xeerkaa Shaqaalaha Wakaaladaha madaxa bannaan (D.P.S-RC. ee 22.4.1972).

3. Wakaaladdu waxay ka kooban tahay qaybtii Daaqa ee Wasaaradda, mashruuca dhaqaalaynta iyo Horumarinta Daaqa iyo mashruuca Daaqa ee loogu talagalay Gobollada Sanaag, Togdheer iyo Nugaal.

4. Wakaaladdu waxay geleysaa (Category B) ayadoo taa micnaheeda lagu caddeeyey qaynuunkii lambarkiisu ahaa 26 ee 22kii Abriile 1972kii.

Qod. 2aad

Ujeeddooyinka: Wawaalacdu waa:

Inay gundhig u samaysaa maamulka iyo habaynta Daaqa, waana inuu madax u noqdaa qof khibrad iyo cilmiba leh;

Inay bilawdaa qorshayn cad oo maamulo dhulka Daaqa oo dhan;
Inay meelmariisaa samays seerayaal xilli ah iyo kuwa abaaqeed;

Inay dhiirisaa horumarinta iyo habka loo samaynayo beeraha baadka xoolaha meeshii ay ka suurowdaba;

In la dhiiriyo waxna la baro da'weynaha xoolo dhaqatada ah, iskaashato habaysanna loo sameeyo;

In biyaha dhulka Daaqa laga sameeyo lagu dhiso qorshayn, loona hirgeliyo si dhulka baadka leh, xoolaha loogu baahiyo asagoon nabaad guurin;

In la sii xoojiyo tababarka cilmiga Daaqa, cammuudda iyo xoolaha loona sameeyo tacliin da'weynaha baadiyaha (Nomadic non formal education);

In naqshado loo sameeyo dhulka Daaqa oo dhan, loona qaybiyo meel waliba waxay ku habboon tahay «Lan classification»;

In la sameeyo xarun lagu uruuriyo geedaha dhulka ka baxa, lana soo saaro buug ay ku qoran yihiin «Plant check list»;

In la ilaaliyo, lana xannaaneeyo geedaha tafii go'aya, ama key-maha waxtarka u leh xagga cilmiga sayniska iyo dhaqaalaha dalkaba.

Qod. 3aad

DHISMAHA (ORGANISATION)

1. Wakaaladdu waxay ku wadi doontaa hawlaheeda Waaxo iyo qaybo ay samaysato kuwaasoo xeer lagu sheegi doono oo Madaxweynaha G.S.K. uu soo saari doono.

2. Wakaaladdu Xafiiskeeda Guud wuxuu ahaan doonaa Muqdisho, Laamo ama Xafiisyo u taaganna waxay ka furan kartaa meelihii ay istiraahdo way ku habboon yihiin oo Gobollada kale ah ee Dalka.

Qod. 4aad

MAGACAABIDDA MAAREEYAHA GUUD

1. Maareeyaha Guud ee Wakaaladda waxaa lagu magacaabi doonaa Dekereeto (Decrees) uu soo saaro Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanku, isagoo la tashaday Xoghayaha Wasaaradda X. Xoolaha Dhirta iyo Daaqa oo hadda la dhihi doono «Xoghayaha»

Qod. 5aad

XILKA

Maareeyaha Guud ee Wakaaladdu wuxuu:

a) — Wakiil iyo Madax ka yahay Wakaaladda;

b) — Wuxuu saxiixi karaa Qandaraasyada la xiriira Wakaaladda asagoo kala tashaday Xoghayaha Wakiilna ka ah Wakaaladda;

c) — Wuxuu mas'uul ka yahay lacagaha Wakaaladda iyo fulinta habboon ee Xisaabaheeda;

d) — Hadduu muddo dheer Maareeyuhu Xafiiska ka maqnaanayo Xoghayuhu, asagoo kala tashanaaya Maareeyaha Guud ayuu qof kale oo khibrad leh u sii magacaabi karaa.

Qod. 6aad

Wakaaladdu way qoran kartaa wixii shaqaale ah oo ay u baahato iyadoo dhaqan gelinaysa qaynuunkii tiradiisu ahayd 36 ee 22.4.1972 iyo Xeerki Wakaaladaha ee D.P.SRC. 74 ee 22.4.1972.

Qod. 7aad

1. Wakaaladda ilaalisteeda Guud waxaa yeelan doona Xoghayaha, asagoo la kaashanaya Guddiga Sare ee Barwaaqaynta oo hadda kaddib la dhihi doono «Guddiga».

2. Xoghayuhu wuxuu bixin doonaa tilmaamo asagoo kala soo tashaday Guddiga, markay u muuqato in tilmaamahaasi hagaajinayaan, kuwatossinayaan Wakaaladda danta Dalka iyo Sharciyada Dalka.

Qod. 8aad

AMAAH SHARCI AH:

1. Wakaaladdu si ay u hirgeliso hawlaheeda lacag, way ka amaan kartaa Bankiyada Dawladda iyo meelihii kale oo ku habboon ayadoo haysata Guddoonka Xoghayaha.

2. Marka amaaha lagala Xaajoonayo Bankiyada Dibedda ah ama hay'ada kale, Wakaaladdu waxay tahay mid si sharci ahaana wakiil ka noqon karta Dawladda Soomaaliyeed.

Qod. 9aad

1. Maareeyaha Guud, ayadoo ayna ka dambeyn karin 31ka Di sembar sanad walba waa inuu isku soo dubbariddaa miisaaniyaddii, taasoo muujineysa wixii soo geli kara ama ka bixi kara Wakaaladda sanaadka soo socda. Bandhigga miisaaniyadda ee sanadka waa in la hor dhigaa Wasaaradda Lacagta iyo Xoghayaha.

2. Markay tahay 31ka March ama inta ka horreysa sanad walba, Maareeyaha Guud waa inuu isku hagaajiyo xisaabtii sanadka iyo bandhiggi macaashka ama khasaaraha Taana uu u soo gudbiyaa Xoghayuhu asagoo la tashanaya Xoghayaha Maaliyadda awood ayuu u leeyahay inuu oggolaado bandhigga Xisaabta la soo sheegay.

Qod. 10aad

MAAMULKA XISAABAHA

Wakaaladku, had iyo jeer waa in maamul hagaagsan ay ku dhagan gelisaa adduunka iyo hawlaha kale ee lacagta ku saabsan iyadoo ilaalinaysa sida habboon ee qawaaniinta iyo xeerarka Qaranka ku xusan.

Qod. 11aad

Xisaabaha Wakaaladda waxaa kormeeri doona Laanta goonida ah ee ka tirsan Xafiiska Hantidhorka Guud loona sameeyey Kormeerka Wakaaladaha Madaxa bannaan.

Qod. 12aad

SHARCIYADA GAARKA AH (REGULATIONS)

Isaga oo uu soo hordhigay Xoghayuhu, Maclaxweynaha G.S.K. wuu soo saari karaa sharciyo gaar ah si loo dhagan geliyo qaanuunkan.

Qod. 13aad

SHARCIYADA GUDAHA

Maareehaya Guud asagoo haysta Guddoonka Xoghayaha wuu soo saari karaa qawaaniin hoose oo xukumaysa dhismaha iyo waaxyaha kale ee ku xiran Wakaaladda.

Qod. 14aad

Qaanuunkii ama wixii kale ee ka hor imaan kara ama aan la secon karin qaynuunkan waa la ba'niyay.

Qod. 15

Qaanuunkani deg-deg ayuu u hirgelayaa, waxaana laga soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ah ee Soomaaliya.

Muqdisho 16.8.1976

Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

GUDDOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

NATIONAL RANGE AGENCY

Law No. 23 of 1976

THE PRESIDENT OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL.

Taking Note of the approval of the Supreme Revolutionary Council and the Council of Secretaries,

Hereby promulgates the following law:

Art. 1

Establishment

1. The National Range Agency hereinafter referred to as the Agency is hereby established.
2. It shall be an Autonomus Agency with juridical personality and shall be governed by the provisions of the following laws:
 - a) Law governing Autonomous Agencies and Audit of Industrial and Commercial participation (Law No. 16 of 1st April 1970) as subsequently amended.
 - b) Law on personnel of Autcnomous Agencies (Law HOC 36 of 22.4.72)
 - c) Sstaff Regulations of Autonomous Agencies (D.P. SRC 74 of 22.4.72 hereinafter referred to as the Staff Regulations)
- 3) The Agency shall compose of the Existing Range Service,, The Rangeland Conservation and Development project 003/72 and the Kuwait Func Range Project for Seenag, Togh dheer and Nugaal.
- 4) The Agency shall be classified as being in category (B) within the meaning and provisions of Law 22.4.72 and the Decree of the Supreme Revolutionary Council No. 74 of 22.4.72

Art. 2

Objectives

1. The Agency shall:-

- establish appropriate administrative infarstuctures headed by a qualified and experienced Official.
- Start a comprehensive National Range Development plan;
- establish grazing and crought Reserves
- promote the techniques of fodder production units in all environmental conditions;

— assist and encourage the setting up of organized structures for guiding and educating livestock owners;

— carry out planned stock-water development in order to achieve a more efficient use of the available grazing areas;

— strengthen the Range Management Education and establish additional non-formal education programmes

— carry out mapping and classification of the rangeland;

— establish central herbarium for plant collections, their identification system and produce check-list of all plants in the Somali Democratic Republic.

— preserve the disappearing plant species or communities which are of scientific or economic importance;

Art. 3

Organization

1. The Agency shall perform its activities through its Departments and Services which shall be provided in the Regulations;

2. The National Range Agency shall have its Headquarter in Mogadishu and shall establish Branches and Offices in other Regions of the Republic.

Art. 4

Appointment of the General Manger

The General Manager of the Agency shall be appointed by a decree of the President of the Supreme Revolutionary Council on the proposal of the Secretary of State for Livestock, Forestry and Range, hereinafter referred to as the Secretary.

Art. 5

Functions of the General Manger

1. The General Manager shall represent and preside over the Agency;

2. He shall, with the authorization of the Secretary, conclude contracts on behalf of the Agency.

3. He shall be responsible for the funds of the Agency and for the proper maintenance of its accounts.

4. In case of temporary absence or impediment of the General Manager, his functions shall be performed by an Officer designated by the Secretary on the advice of the General Manager.

Atr. 6

Staff

The appointment, terms and conditions of services of the Staff of the Agency shall be subject to the provisions of Law No. 36 of 22.4.72 and Regulations issued thereunder.

Art. 7

Supervision

1. The Agency shall function under the supervision of the Secretary in collaboration with the National Rehabilitation Committee of the SRC, hereinafter referred to as the committee.

2. The Secretary may, in consultation with the Committee, give the Agency such directives as it may consider necessary from time to time in order to ensure that its functions are in accordance with the provisions of the Law and the best interests of State.

Art. 8

Loans

1. The Agency may, for the proper discharge of its functions borrow from Government Banks and other financial institutions subject to the prior approval of the Secretary.

2. On negotiation of loans from foreign banks and financial institutions, the Agency will act as a legal representative of the Somali Government.

Art. 9

Budget and Annual Accounts

1. The General Manager shall, not later than 31st December each year, cause to be prepared a Statement of the Annual Budget for the next financial year showing the estimated receipts and expenditures of the Agency. The Agency's Annual Budget Statement shall be submitted to the Ministry of Finance and the Secretary.

2. On or before 31st March of each year, the General Manager shall cause to be prepared the Annual Accounts and profit and loss Statement of the previous year for the Agency and shall submit the same to the Committee and the Ministry for Finance. The Secretary shall, in consultation with the Secretary of State for Finance, be competent to approve the said Annual Accounts.

Art. 10

Maintenance of Accounts

The Agency shall, at all times, keep proper accounts of its funds and the transactions, which shall be maintained in the manner prescribed by the laws and regulations issued by the State for this purpose.

Art. 11

The Accounts of the Agency shall be audited by a separate unit established in the Office of the Magistrate of Accounts for the purpose of auditing autonomous agencies.

Art. 12

Regulations

The President of the Supreme Revolutionary Council may, by decrees, on the proposal of the Secretary and in consultation with the Committee, issue regulations for the proper implementation of this Law.

Art. 13

Internal Rules

The General Manager may, with the approval of the Secretary, issue Internal Rules governing the Organization, establishment and other related matters of the Agency.

Art. 14

Repeal

Any law or provision contrary to, or inconsistent with this law, is hereby repealed.

Art. 15

Coming into force

This Law shall come into force immediately and shall be published in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Mugodishu. 16.8.76

Jaalle Major-Gen. Mohamed Siyad Barre
President
of the Supreme Revolutionary Council

BOGGA LABAAD

X E E R

Xeer (L. 82)

Oggetto: Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Libera Disponibilita' Jaalle Cabdulqaadir Xaaji Sheegow — ku yaal Muqdisho — Xaafadda Hodan, kuna fadhiya mq. 450 / Guri Lamb. H.O. 828.

Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay Libera Dis Jaalle Moxamuud Gabdi Xirsi Warsame — kuna fadhiya mq. 450 / Guri lam. WIG. 84.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

ISAGOO ARKAY: Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxay 13kii Settembre 1973kii;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 144 soona baxay 23kii Maajo 1961kii;

ISAGOO ARKAY Arjigii uu keensadeen Macalim Cabdulqaadir Sheekh Ibraahim iyo Shoble Maxamed Afrax taariikhdu markay aheyd 24.1.1963 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Xaafadda Hoc'an;

ISAGOO ARKAY: Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, 1.6/11 soona baxay 25 Nov. 1963, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY: L. 17407, kuna saabsan dhismo dhagaxeed, naqshadda oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar, fadhigoodii 327aad taariikhdu ahayd 24 FEB. 1964;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda 1.1240 taas oo beddeshay middii hore oo lambarkeedu ahaa 17407 lagana aqoonsaday fadhigii 11aad ee Guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taariikhdu markay aheyd 4 Maajo 1966, kuna saabsan dhismo Guri ah laba «Villa»;

ISAGOO ARKAY: Bolleetada lamb. 23354 ee 3 Maajo 1964 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Macalim Cabdulqaadir Sheekh Ibraahim iyo Shoble Maxamed uu bixiyeen lacag dhan Sh. So. 1.800/ kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGOO AQOONSAN: Dhulka la weydiistay, kusa fadhiga mq. 900/ loona tiriyay Macalim Cabdulqaadir iyo Shooble Maxamed sida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 18 Novebre 1964;

ISAGOO ARKAY: Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Waaxda Dhismaha iyo dhulka; taariikhdeeduna aheyd 8.6.1976 taasoo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar 1.1240 ee 29.6.76, laguna haqiijiyay sida ay naqshaddu guriga waafaqsantahay;

ISAGOO ARKAY: Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan Xamar. Xaafadda Hodan, laguna siiyay xaashida lamb. 1894 ee 3 GIU. 1976 oo Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGOO ARKAY: Qoraal (Atto) 1.6516 Reb. taariikh. 5 Abriile 1965; lagu diiwaan geliyay Xamar 29 Maaajo 1965 al n.405 Atti public Vol. 16 ooah caddeynta Notaayada Micheal Mariano taas oo Macalim Cabdulqaadir Sheekh Ibraahim iyo Shoble Moxeed Afrax ka gadeen kuna wareejiyeen Xaaji Abuukar Maxamed wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah ooko fadhiga mq.900;

ISAGOO ARKAY: Qoraal (Atto) 1.7832 Reb. taariikh. 21 Maaajo 1966 lagu diiwaan geliyay Xamar 11.6.1966 Atti Pubblici Vol. 17, oo ah caddeynta Notaayada Micheal Maariano taas oo xaaji Abuukar Maxamed ka gaday kuna wareejiyay Abdulqaadir Sheekh Cismaan wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah oo ku fadhiga mq. 900.

ISAGOO ARKAY: Qoraal (Atto) 1.1465 Reb. taariikh. 18.11.68 lagu diiwaangeliyay Xamar 19.11.1968 al n. 865 Atti Pubblici Vol. 19 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Xasan Warsame Cali, taas oo Cabdulqaadir Sheekh Cismaan Shaafi ka gaday kuna wareejiyay Asha Daimar Cali, Xaawa Xaaji Muuse Boqor, ayey Xaaji Muusa Boqar iyo Hodan Xaaji Muuse Boqor, oo u ah wakiil Xaaji Muusa Boqor, wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ahoo ku madhiya mq. 450 kuna yaal Muqdisho Xaafadda Hodan

ISAGOO ARKAY: (Atto) 1.466 Reb. taariikh. 18.11.1968 lagu diiwaangeliyay Xamar 19.11.1968 al n. 866 Atti Pubblici Vol. 19 oo ah caddeynta Notaayada Dr Xasan Warsame Cali taas oo Cabdulqaadir Sheekh Cusmaan Shaafi ka gaday kuna wareejiyay Sahra Xaaji Cismaan, Dunie, iyo Khadiija Xaaji Muusa Boqar, oo u ah wakiil, Xaaji Muusa Boqor, wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiga mq. 450 kuna yaal Muqdisho — Xaafadda Hodan;

ISAGOO ARKAY: Qoraal (Atto) 1.12961 Reb. taariikh 29.6.1974 lagu diiwaan geliyey Xamar 30.6.1974 al n. 192 Atti II. Vol. 20 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Xasan Warsame Cali, taas oo Xaaji Muusa Boqor oo u ah wakil caasha Dalmar Cali, Xaawa Xaaji Muusa Boqor, ayaan Xaaji Muuse Boqor iyo Hodan Xaaji Muuse Boqor, wuxuu ka gaacay kuna wareejiyey Xaaji Imaan Aadan Cali, wax allaale wixii xuquuq ah oo iuu saabsan dhulka ku fadhiya mq. 450/= kuna yaal Muqdisho, Xaafadda Hodan;

ISAGOO ARKAY: Qoraal (Atto) 1.8092 Rep taariikh 14.10.75 lagu diiwaan geliyay Xamar 16.10.1975 al n. 327 Atti Pubblici Vol. 66 oo ah caddeynta Dr. Xasan Warsame Cali taas oo Ismaan Aadan Cali ka gaday kuna wareejiyay Cabdulqaadir Xaaji Sheegow wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay caadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 450 kuna yaal Muqdisho — Xaafadda Hodan;

ISAGAA ARKAY: Qoraal (Atti) 1.18093 Reb.taariikh. 14.10.1975 lagu diiwaan geliyey Xamar 16.10.1975 al n. 327 Atti pubblici Vol. 66 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Xasan Warsame Cali taas oo Iimaan Aadan Cali ka gaday kuna wareejiyey Cabdulqaadir Xaaji Sheegow wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay caadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 450/ kuna yaal Muqdisho — Xaafadda Hodan;

ISAGOO AQOONSAN: In la tixgeliyay wax allaale wixii waa-jib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowlad-deed (Concessione e conseguente libera disponibilita') oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, Wuxuu soo saarayaa

X E E R

B) Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, loona aqoonsaday Cabdulqaadir Xaaji Sheegow, dhul ku fadhiya mq. 450/ kuna yaal Muqdisho — Xaafadda Hodan.

T) Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, loona aqoonsaday Maxamed Cabdi Xirsi Warsame, dhul ku fadhiya mq 450/ kuna yaal Muqdisho — Xaafadda Hodan.

Muqdisho, 19 Luulyo 1976

Wasiirka Wasaardada Hawlaha Guud
Inj Maxamed Xawaadle Madar

WAA ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 18

Muqdisho, 22 Luulyo 1976.

Hantidhawrka Guud.

G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur.

Xeer (L. 83) ee 15.8.1976 Iskaashatada Xamaaliga ee lagu magacaabo «Liibaan»
Wasiirka Dawladda

WASAARADDA GANACSIGA

WASIIRKA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY: Go'aanka 1aad iyo kan 2aad ee Kacaanka
21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambarkiisu yahay 40 ee Horuma-
Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo
dhaqan galay 4.10.1973.

ISAGOO ARKAY: Arjiga uu soo qortay Guddoomiyaha Iskaasha-
tada Xamaaliga «Liiban» ee Magaalada Xamar.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Taladii Guddiga Iskaashatooyinka
ee Gobolka Banaadir.

AMAR XEER

Qodobka 1aad

Iskaashatada Xamaaliga ee lagu magaacabo «Liiban», saldhigeedu-
na yahay Degmada Shingaani, shaqadeeduna tahay Raridda iyo Dejin-
ta Alaabta Wakaaladda Ganacsiga Dharka iyo Maacuunta, waxaa
laga diiwaan geliyey Xafiiska Iskaashatooyinka ee Wasaaradda Ganac-
siga, taasoo waafaqsan qodobka 15aad ee Sharciga lambarkiisu yahay
40ka oo dhaqan galay 4.10.1973.

Qodobka 2aad

Marka laga bilaabo maalinta xeerkani lagu soo qoro Faafinta Ras-
ga ah ee Dawladda, Iskaashatada Xamaaliga «Liibaan» waxay yeela-
naysa aqoonsi gaar ah oo sharci ku dhisan; xeer gaarkeeduna wuu
dhaqan galayaa.

Muqdisho 15.8.76

WASIIRKA DAWLADDA
(Jaalle S. Guuto Maxamed Cali Shire)

Xeer (L. 84) ee 15.8.1976 Iskaashatada ganacsiga «Hilaac»

WASIIRKA GANACSIGA

WASIIRKA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo dhaqan galay 4.10.1973;

ISAGOO ARKAY: Arjigii uu soo qortay Guddiimiyaha Iskaashatada Ganacsiga Dharka iyo Maacuunta iyo Alaabta Dhismaha ee la magac baxday «HILLAAC» ee Degmada Qoryoolay.

ISAGOO TIXGELINAYA: Taladii Gudciga Iskaashatooyinka ee Degmada Qoryoolay iyo kan Gobolka Sh. Hoose.

AMAR XEER

Qodobka 1aad

Iskaashatada Ganacsiga «HILLAC» ee saldhigeedu yahay Magaalada Qoryoolay, shaqadeeduna tahay Ganacsiga Alaabta Dhismaha Dharka iyo Maacuunta Deg Qoryoolay.

Waxa laga diiwaan geliyay Xafiiska Iskaashatooyinka ee Wasaaradda Ganacsiga, taasoo waafaqsan 15aad ee sharciga lam. yahay 40ka oo dhaqan galay 4.10.1973.

Qodobka 2aad

Marka laga bilaabo maalinta xeerkani lagu soo saaro Faafinta rasmi ah ee Dawladda, Iskaashatada Ganacsiga Dharka iyo Maacuunta iyo alaabta dhismaha «HILLAAC» ee Degmada Qoryoolay waxay yeelanaysaa aqoonsi gaar ah oo sharci ku dhisan; xeer gaarkeeduna wuu dhaqan galayaa.

Muqdisho, 15.8.1976.

WASIIRKA DAWLADDA
(Jalle S. Guuto Maxamed Cali Shire)

BOGGA SADDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cabdulqaadir Nuur Salaad maalintii 29.11.73 loona ogolaaday oo ku yill Muqdisho degmada Hodan Jidka 26 Juun iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa rektangolaar addimihisuna ahaayeen 40X20 kuna fadhiye 800/ mdi, sababtoo ah in la sii qorsheeyay meesha iyada ah sidaas awgeedna wax ku siyaadeen dhulka asaga ah.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG/3/23/1184 ee 26.12.73kii baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:-

Rarsima ahaan dhulka haatan lasiisn-karo jaallahaas qaabkiisu waa rektangolaar addimihisuu yihiin 60X20 kuna fadhiya 1200/ soohdimisura yihiin sida soo socota:-

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 12 iyo 18.

Bari waxaa ka xiga: Dhul lam. 14 iyo 20

Muqdisho 3.8.1976

Agaasimaha waaxda Dhismaha iyo Dhulka

(309)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cali Ciise Ileeye degmada Waaberi Jidka M. Mukarama uu iska becdelay cabbirkii hore Ciise Ileeye maalintii 2.11.1959 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho oo qaabkiisu ahaa Afar Gees addimihiisuna ahaayeen 24X24 kuna fadhiya 576 mdh, sababtoo ah in waddooyin lagamamaar-maan ah ay qaar ka jareen.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lam-barkeedu ahaa 1010706 ee 23/2/60 kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman :-

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa Rektangolar addimihiisu yihiin 24X19,80, kuna fadhiya 475,20/ sooh-dimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waadada Maka Mukarama.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga Waddo.

Bari waxaa ka xiga Waddo.

Muqdisho, 18.8.1976

Agaasimaha waaxda Dhismaha iyo Dhulka

(L. 310)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Caasha Maxamed Kulan u soo qoratay arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 18.5.76 uu ku weydiisanayay gabal dhul cowladeed ah oo ku yaal Magnaladatan Xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay rektangolar addimihiiisu yihiin 30X20 kuna fadhiya 600/ Mdh. soohdimihiiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 258K.

Koonfur waxaa ka xiga Wa'ado.

Galbeed waxaa ka xiga Dhul lam. 230K.

Bari waxaa ka xiga Dhul lam. 232K.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naq-shadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H.G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (so'don) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho 24.8.1976

Agaasimaha waaxda Dhismaha iyo Dhulka

(L. 311)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Raxma Gurxan Cilmi u soo qoraday arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 18.5.76 uu ku weydiisanayay gabal dhul dowladeec ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmad Hodon qaabkiisun yahay rektangolar addimihiisu yihiin 30X20 kuna fadhiya 600/Mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hocs ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga Dhul lam. 257K.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam 229K.

Bari waxaa ka xiga: Dhul lam. 23K.

Qofkii daneynaaya dhulka wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H.G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soo'don) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Agaasimaha waaxda Dhismaha iyo Dhulka

(L. 312)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Jaamac Badmaax u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulkamaalinti taariikhdu ahayd 13.3.1976 uu ku weydiisanayay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degamada Hodan 5km qaabkiisuna yahay rektangular addimihiisuna yihiin 40X25 kuna fadhiya 1000/ Mq. soohdimihiisuna yihiin sda hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Dhul dowladeed.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H.G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

MUqdisho 24 Agoosta 76.

Agaasimaha waaxda: Dhismaha iyo Dhulka

(L. 313)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Faarax Gadiid u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 7/4/76 uu ku weydiisanayay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodon qaabkiisuna yahay rektangolar ad-dimihiisuna yihiin 30×20 kuna fadhiya $600/=$ Mdh. soohidimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.-

Koofur waxaa ka xiga: Waddo.-

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 102k.-

Bari waxaa ka xiga: Dhul lam. 104k.-

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H.G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.-

Muqdisho, 24 Agu. 1976

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

(314)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la codeynayaa in Jaalle Maxamed Xaaji Xuseen u soc qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taarikhdu ahayd 13/9/75 uu ku weydiisanyay dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xaafad-da Hecan oo leh qiyaas rektanglar ah 15.40x20 kuna fadhiya 308/= Mdb. Soddimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam.2.-

Kocfur waxaa ka xiga: Waddo.-

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam.6.-

Bari waxaa ka xiga: Dhul lam.8.-

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhi smaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga docdi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalinood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dowladda.

Muqdisho, 24 Agu. 1976

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

(315)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sheekh Cabdi Maxamed (Madoobe) u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 17/12/75 uu ku weydiisanayay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaa Magaaladatan Xamar degmda Hodan qaabkiisuna yahay rektangolar addimihiisu yihiin (56×26) kuna fadhiga 1456/= Mdh. soohdimiisuna yihiin sida hocs ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.-

Koofur waxaa ka xiga: Waddo.-

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.-

Itari waxaa ka xiga: Dhul lam. 56k.-

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H.G. waxaana laga docdi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.-

Muqdisho, 24 Agu 1976

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

(316)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ciisse Muuse Saciid u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 25/7/75 uu ku weydiisanayay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay rektangolar addimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.-

Koofur waxaa ka xiga: Waddo.-

Galbeed waxaa kaxiga: Dhul lam.116k.-

Bari waxaa ka xiga: Waddo.-

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka ootaal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H.G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.-

Muqdisho, 24 Agu.1976

Agaasinka Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

(317)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Hodan Ciise Cabdi, u soco, qortay Waaxda Dhismaha iyo Dhulka madaama uu ka baxayd 15/11/75 uu ku weydiisanayay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar dogmada Hodon qaabkiisuna yahay rektangolar ad-dimihisu yihiin $30 \times 8 = 240$ kuna fadhiya $240 / = \text{Mdh. sochdimihisuna}$

yihiin sida hogs ku tilmaan:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay.-

Koofur waxaa ka xiga: Waddo.-

Galbeed waxaaka xiga: Waddo.-

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul helay loo siiyay jaallahaas asaga ah.

Baro waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay.-

Qofkii dancynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H.G. waxaana laga docdi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 24 Agu 1976

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

(518)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

NAADA DHUL

Waxaa la qaddeynayaa in jaalle Cosob Barkhadle Faahiye u soo qortay arji, Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taarikhdu ahayd 27/7/76 uu ku weydiisanayay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay regtangolar addimihisu yihiin 30×20 kuna fadhiya $600/ =$ Mdh. soohdimihiisuna yi-

hiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxa ka xiga: Waddo.-

Koofur waxaa ka xiga: Waddo.-

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 93k.-

Bari waxaa ka xiga: Waddo.-

Qaarkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadaha dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H.G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.-

Muqdisho, 24 Agu 1976

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

(319)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Caasha Guuleed Maxamed u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 25/7/76 uu ku weydiisanayay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay afar gees siman addimihiisu yihiin 27×27 kuna fadhiya $729 / =$ Mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoois ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga Waddo.-

Koofur waxaa ka xiga: Waddo.-

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo yar.-

Bari waxaa ka xiga: Waddo.-

+bs VmQgn = 1.eiiy

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H.G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.-

Muqdisho, 24 Agu 1976

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

(320)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in jaalle Madiina Jumcaale Cawaale u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 16/5/76 uu ku weydiisanayay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada H. Wadaag qaabkiisuna yahay afar gees ad-dimihiisu yihiin 27 x 27 kuna fadhya 729/=Mhd. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.-

Koofur waxaa ka xiga Waddo.-

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.-

Bari waxaa ka xiga: Waddo.-

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H.G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho 24.8.76

Agasinka Waxda Dhismaha iyo Dhulka

(321)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xuseen Maxamed Nuur u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdii ahayd 5/8/76 uu ku weydiisanayay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Waabri qaabkiisunayahay afar gees siman addimihisu yihiin 12×12 kuna fadhiga 144/= Mdh. soohdimihisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Suuli Cismaah Axmed.-

Koofur waxaa ka xiga: Waddo.-

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.-

Bari waxaa ka xiga: Abuukar Cumar Maxamed.-

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H.G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood h oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.-

Muqdisho, 24 Agu. 1976

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

(322)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa ini Jaalle Muxiyidiin Maxamed Nuur u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 3/8/76 uu ku weydiisanayay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Kamar degmada Waaberi qaabkiisuna yahay afar gees siman addimihisu yihiin 12×12 kuna fadhiya $144 / =$ Mdh. soohdimihiisuna

yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.-

Koofur waxaa ka xiga: Xasan Xuseen.-

Galbeed waxaa ka xiga: Xasan Muuse.-

Bari waxaa ka xiga : Waddo.-

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo aal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H.G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.-

Muqdish, 24 Agu. 1976

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

(323)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

NAADA DHUL

Waxaa la cadeynayaa in Jaalle Cali Maxamed Jumcaale u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 16/1/66 uu ku weydiisanayay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Yaaq-shiid qaabkiisuna yahay rektangolar addimihisu yihiin 30×20 kuna fadhiya 600/= Mdh. sochdimihisuna

yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay.-

Koofur waxaa ka xiga: Cabdulle yuusuf.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay.-

Bari waxaa ka xiga: Waddada Balcad.-

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H.G. waxaana laga doodi kraa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagusooqoro buugga faafinta rasmiga ah.-

Muqdisho, 24 Agu. 1976

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

(324)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Daahir Maxamed Kahyre u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 9/2/76 uu ku weydiisanayay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Wardhiiglay qaabkiisuna yahay rektangolar addimihiihun yihiin 20×13 kuna fadhiya 260/= Mdh. soohdimihiisuna

yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Isniina.-

Kocfur waxaa ka xiga: Cilmi Faarax.-

Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Sh. Calawi.-

Bari waxaa ka xiga: Geelle.-

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H.G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalintalagusooqoro buugga faafinta rasmiga ah.-

Muqdisho, 24 Agu. 1976

(325)

Agaasinka Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDL: Arkay dacyadda kor ku qoran;

MARKUU: Arkay waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bangiga Ummadda (eeg. 00155), wuxuu ogaaday inay shaqadiisa tahay?

HADDUU: Arkay qod. 69 D.L.9.9.65 n. 2: lumidda buugga keydka lam.4 ku qoran lacag dhan di Shs.So.8.780 ku qoran Yaasin Aaden Faarax;

WUXUU AMRAYAA

in loo cusboonaysiiyo buugga keydka oo ku qoran Yaasin Aaden Faarax ka dib markii aan 30 maalmood ka soo wareegto maalinta dekertada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah eedawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In buuga cusub ee la samey doono gacanta laga saaro Jaalle Yaasin Aaden Faarax ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah ayadoo la sugaayo mudada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 15.6.76

GUDDOM. MAXK. GOBOL. BENAADIR

(Maxamed Muumin Maxamed)

(L. 326)

**OGEYSHISKA: SAAMILEYDA WARSHADDA SAABUUNTA
QUBEYSKA IYO MARISKA**

Waxaa dhammaan saamileyda Warshadda saabuunta qubeyska & Mariska la ogeysiinaa in dhammaan saamileyda ay isugu timaad shir aan caadi ahayn bisha Nofeembar 30keeda saacaddu markey tahay 7 galabnimo saldhigga warshadda saabuunta qubeyska & mariska.

ARRIMAHA DOODDA

- 1) Kordhin hantida shirkadda
- 2) Iyo wixii kale oo soo raaca

Dhammaan saamileyda waxaa laga codsanaa in ay waqtiga dhawraan fadhigana aaney ka maqnaan.

Muqdisho, 26.10.1976.

GUDDIGA MAAMULKA

(L. 327)

SOMALI AIRLINES S.P.A.

OGEYSIIS ISU IMAATIN GUUDNIMO OO CAADI AH

Dadka qaybaha ku leh Sharikadaha Soomaali Airlines S.P.A. waxaa la weydiisanayaa inay ka soo qayb galaan shir guudnimo oo caadi ah laga qaban doono saldhigga Muqdisho, maalinta 30kii Setembar 1976. Saacaddu markay tahay 17ka galabnimo. Haddii shirkaasu suura geli waayo maalinta 30ka waxa mar labaad laysu imaan doonaa 26 Oktoobar saacaddu markay tahay 17ka galabnimo. Waxyaabaha shirka lagaga wada hadli doonaa waxaa waaye:

1. Xogwarrankii ay soo sameeyeen Guddiga maamulka Guud iyo kii ay soo sameeyeen Guddiga Baarayaasha.
2. La horkeeno miimaaniyadda iyo xisaabihii khasaaraha iyo macaashka oo ku eg 31.12.75 iyo go'nada laga gaadhi doono.
3. Magacaabid Guddiga maamulka Guud iyo Guddiga Baarayaasha.
Waxaa loo oggol yahay inay ka soo qayb galaan shirka dadka wax leh Sharikadda, ee ku qoran buugga rasmiga ah ee Dadka Qaybaha Sharikadda ku lehi ay ku qoran yihiin, ee isla markaana dhiibay qaybohoodii. Si ay uga qayb qaadan karaan shirkan, waa in dadka qaybaha lehi ay dhigaan qaybohoodii khasnadda Sharikadda amase Bankiga la yidhaado BANCO DI ROMA ee Rooma ah (5 maalmood shirka ka hor).

SOMALI AIRLINES S.P.A.

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Somali Airlines S.P.A. sono convocati in Assemblea Ordinaria in Mogadiscio presso la sede sociale in Piazza del parlamento, per il giorno 30 settembre 1976 alle ore 17.00 in prima convocazione e, occorrendo, in seconda convocazione il giorno 26 ottobre alle 17.00 nello stesso luogo, per deliberare sul seguente

ORDINE DEL GIORNO

1. Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale.
2. Presentazione del Bilancio e del Conto Profitti e Perdite e deliberazioni relative.
3. Nomina del Consiglio di Amministrazione e del Collegio Sindacale.

Possono intervenire i Soci che risultino iscritti nel libro Soci ed abbiano effettuato il deposito delle azioni. Per l'intervento in Assemblea le azioni potranno essere depositate almeno 5 giorni prima, presso la casa sociale o presso il Banco di Roma, Roma.

Mogadiscio. 31 Agosto 1976

P. il Consiglio di Amministrazione

IL PRESIDENTE